



# **BUUG TILMAAMEED ANSHAXA IYO HAB-DHAQANKA BOOLISKA**

**ADEEGGA IYO BADBAADINTA**

**HORDHAC KOOBAN**

**ICRC**

# ICRC

 [facebook.com/icrc](https://facebook.com/icrc)

 [twitter.com/icrc](https://twitter.com/icrc)

 [instagram.com/icrc](https://instagram.com/icrc)

**Ergada ICRC ee Soomaaliya**

Wadada Denis Pritt

S.B 73226 - 00200

T +254 20 2719 301

Nayroobi, Kenya

© ICRC, Agoosto 2020

Sawirada: Kenneth Omollo

# **BUG TILMAAMEED ANSHAXA IYO HAB-DHAQANKA BOOLISKA**

**XEERKA CAALAMIGA AH EE XUQUUQDA AADANAHA  
IYO MABAADII'DA AADANAHA OO LA XIRIIRA  
SHAQADA BOOLISKA**

# ANSHAXA IYO HAB-DHAQANKA BOOLISKA

ADEEGGA IYO ILAALINTA  
DADKA BULSHADA AAD LA NOOSHAHAY



# ANSHAXA IYO HAB-DHAQANKA BOOLISKA

## QODOBADA MUHIIMKA AH

- Markasta fuli waajibaadkaaga oo sharcigu kuu xilsaaray, adigoo bulshada u adeegaya kana badbaadinaya falal dambi ah.
- Xushmee oo badbaadi sharafta aadminimada, dhowr oo taageer xuquuqda aadminimada ee qof walba.
- Xoog u isticmaal xaaladaha lagama marmaanka ah oo keliya, isticmaalka xoogana u xaddid inta loo baahdo oo macquul ah.
- Waa inaad xafidaa sirta laguugu aaminey.
- Ilaali oo fuli intii waajibaadkaaga ah ama baahida ay cadaalada u baahato kashifida macluumaadkaas.
- Ha u geysan jir-dil ama hab-dhaqan xun oo ka baxsan aadminimada.
- Hubi badbaadinta caafimaadka ee qof kasta oo aad gacanta ku heyso.
- Haku dhaqmin wax musuq-maasuq ah.
- Ixtiraam sharciga iyo qaanuunkan anshaxa oo ka hortag iyo ka soo horjeeso wixii xadgudub ah oo iyaga ka mid ah.

Qodobadaan waxey ku saleysanyihiin xeerka hab-dhaqanka saraakisha fulinta sharciga ee qaramada midoobay (UN)

## XUQUUQDA ASAASIGA EE DADKA

### XUQUUQDA AAN LAGA QAADI KARIN QOFKA

#### **Xaqa nolosha**

Xaqa qof kasta uu u leeyahay nolosha ayaa cidna ka qaadi karin si aan sharci aheyn.



#### **Mamnuucida jir-dilka**

Jir-dil ama ciqaab ka baxsan aadminimada waa ka mamnuuc xaalad kasta.



# XUQUUQDA ASAASIGA EE DADKA

## XUQUUQDA AAN QOFNA LAGA QAADI KARIN

### Mamnuucida sharciga oo ciqaabaya falal la sameyay waqtigii aysan dambi aheyn

Cidna looma ciqaabi karo falal la sameeyay waqtigii aysan dambi ahayn oo hoos-imaanaya xeerka qaranka ama kan caalamiga ah.



# WAAJIBAADKA BOOLISKA

## FULI SHARCIGA QARANKA

Wajibaadka waxey yihiin:

- In aad badbaadiso nolol iyo hanti;
- In aad sugto amniga bulshada;
- In aad dib usoo celiso oo badbaadiso ammaanka iyo nabada dadweynaha;
- In aad xushmeeyso xuquuqda insaanka adigoo aan kala saareyn dadka.



## KA FEEJIGNOW OO KA HORTAG FALAL DEMBI AH

Waxaa tahay qeyb ka mid ah bulshada.

Waa inaad dhiirgaliso iskaashiga u dhaxeeya booliska iyo bulshada.

Waxqabadkaagu waa in uu dhiirgaliyo oo kor u qaado kalsoonida iyo xushamada u dhaxeeya booliska iyo bulshada.





# WAAJIBAADKA BOOLISKA

## SUG OO DIB U SOO CELI AMMAANKA IYO NABADDA DADWEYNHA

Qofkasta wuxuu xaq u leyahay inuu heysto ra'yigiisa soona jeedin karo ra'yigaas, uuna ka-qeybgali karo urur iyo isku imaad si nabad ah.

Wajibbaad ayaad leedahay oo ah in aad sugto oo dib u soo celiso ammaanka iyo nabadda dadweynaha si waafaqsan sharciga.



## CAAWI BULSHADA XILIYADA LOO BAAHDO GARGAARKA DEGDEGGA AH

Waa in aad bixiso kaalmo iyo gargaar deg deg xiliyada loo baahdo.



# AWOODDA BOOLISKA

## WAXAA MAMNUUC AH IN QOF LA QABTO LANA XIRO SI SHARCI DARO AH

### Qabashada

Waa inaad:

- Ula macaamisho qofka laqabtay si sharaf iyo aadminimo leh;
- U sheegtaa dacwaddooda;
- U sheegtaa xuquuqdooda marka la qabtay;
- U qaadatid in qofka la qabatay inaanu dembi laheyn waqtiga la qabtay;
- Ka hortag waayis qasab ah iyo dil maxkamad la'aan ah.



### Xiritaan

Maxaabiistu waxey xuquuq uleeyihiin:

- Iney la kulmaan looyar;
- Iney la kulmaan takhtar;
- In lagu xiro meel xiritaan oo rasmi ah;
- Iney la xariiran debadda (kaas ahaan qoosaskooda);
- Iney si deg deg ah ka doodaan sababta xiritaankooda;
- In la hor keeno maxkamada si ay uga jawaabaan dacwada lagu soo oogay;
- In la horkeeno maxkamada si caddaalad ah iyo muddo macquul ah hadii kale waa in lasii daayo.



# AWOODDA BOOLISKA

## Baar gacantana ku dhig

Dadka la baarayo waa in lala macaamilo si sharaf leh, hantidoodana waa in la dhowro.

Baariitaanka wa in lagu fuliyaa si waafaqsan sharciga.



## Isticmaalka xoogga iyo hubka

Xoogga la isticmaalayo waa inuu u dheelitiran yahay inta macquulka ah iyo nooca dembiga iyo ujeeddada sharciga ah.

xoogga dilaa ah waa talaba aad u culus oo laggu qaddi karo xaaladahaan hoos ku qoran oo kali ah:

- Markii laga maarmi karin;
- Markey jirto halis dhimasho ah ee si dhaqso leh ku dhici karto.



# KOOXAHA NUGUL

## DUMARKA

Waa inaad aqoonsataa in dumarku aad ugu nugul yihiin dembiyada la xirriira jinsiyada.

Baaritaan korkeeda ah waa ineey fuliyaan saraakiil dumar ah oo keliya.

Dumarka waa in lagu xiro meel ka duwan meesha ragga. Hadii taasi aaney suurto gal aheyn maxaabiista dumarka ah waa in lagu xiro qolal gaar ah.



Dumarka uurka leh ama hooyo nuujinaysa waa in la siiyo adeegyo gaar ah waqtiga ay ku jiraan xiritaanka.

## QOF AAN QAANGAAR AHAYN

waxey u baahan yihiin ilaalin qaas ah oo dheeraad ah da'dooda iyo nugeylkooda awgood;

Qof aan qaangaar aheyn waa in lagu xiro meel ka duwan meesha dadka waaweyn hadii loo arko sabab gaar ah waa lala xiri karaa dadka waaweyn.



# KOOXAHA NUGUL

## DADKA QAXOOTIGA AH IYO BARAKACAYAAL

Waa inaad aqoonsato in ay yihiin dad aad u nugul xaaladahooda awgeed.

Waxey leeyihiin xuquuqda aasaasiga ah oo u wada siman yihiin dadka oo dhan.

Dadka qaxootiga ah iyo barakacayaal waa in loo tixgeliyo noloshooda, sharaftooda, iyo caafimaadkooda xagga jirka iyo dhimirkaba.



## DHIBANAYAASHA DEMBI

Ula dhaqan dhibanayaasha si la mid ah sida aad rabto in laguugula dhaqmo adiga naftaada ama xubnaha qoyskaaga.

Waqtiga aad la kulanto waa in aad u aqoonsato in ay yihiin dhibanayaal aadna xushmeyso xaquuqdooda aadminimada.



## BADBAADINTA DADKA LAGA QAADAY XORIYDOODA



# BADBAADINTA DADKA LAGA QAADAY XORIYDOODA

Booqashada ICRCda ujeedadeedu waxey tahay in la qiimeeyo xaaladaha xiritaanka iyo hab-dhaqanka loo geysto dadka laga qaaday xorriyadooda.

Xaalad kasta ICRCdu waxey isticmaashaaa qaabka shaqadeeda oo isku mid ah iyadoo u shaqeynayso dadka laga qaaday xorriyadooda, iyadoon la eegayn keliya xaaladaha khuseeya Axdiyada Jeneefa:

- Iney arkaan dhammaan dadka laga qaaday xorriyadda iyadoo u leh ogolaansho iney la hadlaan dhamaan maxaabiista;
- Ogolaansho iney tagaan dhamaan dhismooyinka iyo meelaha ay isticmaalaan ama loogu talagalay maxaabiista;
- Fursad ay kula hadlaan maxaabiista si xor ah oo asturan;
- Liiska dhamaan maxaabiista goobaha jooga oo ay daneeyneyso ama waa in la siiyo fursad ay ku aruriso liis kale
- In loo oggolaado iney ku soo noqoto booqashooyin kale sida ay rajeyneyso ICRCdu.

## ICRCDA WAXEY KU DADAASHAA IN AY:

- Ka hortagto waayis qasab ah, dil maxkamad la'aan ah, jir-dil iyo hab-dhaqan xun;
- Hagaajiso xaaladaha xaaladaha xiritaanka;
- Hubiso tixgelinta ama habka ama ballanka maxkamadda oo ilaaliso dadka laga qaaday xorriyaddooda;
- Dib u soo celiso xiriirka u dhaxeeya maxaabiista iyo qoysaskooda;
- Taageerto maxaabiista lasii daayay iney dib ugu noqdaan bulshada.

## HOGGAANKA IYO MAAMULKA

Waa inaad:

- Tixgaliso aadna raacdo sharciga;
- U wargeliso sarkaal sare haddii aad aragto hab-dhaqan xun ama sharci darro oo uu sameyay sarkaal kale;
- Xasuuso waajibaadka kaa saran bulshada.



## WAA IN AAD UGU DAMBEYNTII QAADATO MAS'UULIYADDA HAB-DHAQANKA IYO FALALKAAGA





## QORO FAAHFAAHIN DHEER

Adigoo ah mid ka mid ah xubnaha ciidamadda Booliska ama amniga, waxaad sii xoojin kartaa aadminimaddaada aadna muujin karto sharaftaada hadii aad qorto faahfaahin dheer oo ku saabsan waxqabadkaaga:

Adigoo shaqadaada fulinaya waa inaad ka jawaabto suaalahan soo socda:

**YAA** goob-jooga aha ama sameeyay falkii?

Gaar ahaan, **MAXAA** dhacay?

Dhacdadu **GOORMAY** dhacday (taariikhdi, saacadii, xaaladihii kale)?

**HALKEE** dhacdadu ka dhacday (faahfaahin ka bixi)?

**MAXAY** dhacdadu u dhacday (sabab)?

**SIDEE** dhacdadu u dhacday?

Waajibaadkaaga sharciga ah wuxuu yahay inaad si fiican u uruuriso dhaamaan macluumaadka xaqiiqda ah muddada baaritaanka la fulinayo. Waajibaadkaaga **ma aha** go'aansasho qofka dembigiisa ama dembi la'aantiisa. Go'aankan waa shaqada maxkamadda oo keliya. Maraggaaga waa mid muhiim u ah maxkamadda, soo-bandhigaaga markhaati waxaa xoojin karaa sumcaddaada iyo tan ciiddamada Booliska ama ciiddamada amniga oo aad la shaqeyso.

## QORO FAAHFAAHIN DHEER

# ISTICMAALKA SHARCIGA


## QAANUUNKA BUUGGAN WAXAY KA IMAANAYAAN ISTICMAAL SHARCIGA AH EE SOO SOCDA:


- Heshiiska caalamiga ah ee xaquuqda dadweynaha iyo siyaasadda
- Heshiiska caalamiga ah ee suulinta nooc walba oo midab takoor ah
- Heshiiska xaquuqda caruurta
- Qaanuunyada Aasaasiga ah ee macamiilka maxaabiista
- Xeerka hab-dhaqanka saraakiisha fulinta sharciga
- Baaqa mabaadii'da caddaalada asaasiga ah ee dhibanayaasha dembiga iyo adeegsiga awoodda si qaldan
- Baaqa mabaadii'da badbaadinta ee qof kasta oo lagu xiro nuuc walba xiritaanka
- Mabaadii'da Aasaasiga ah ee macaamilka maxaabiista
- Mabaadii'da Aasaasiga ah ee saraakiisha fulinta sharciga ay u isticmaalaan xoog iyo hub
- Baaqa ee suulinta rabshadaha ka dhanka ah dumarka.



# ICRC

 [facebook.com/icrc](https://facebook.com/icrc)

 [twitter.com/icrc](https://twitter.com/icrc)

 [instagram.com/icrc](https://instagram.com/icrc)

**Ergada ICRC ee Soomaaliya**

Wadada Denis Pritt

S.B 73226 - 00200

T +254 20 2719 301

Nayroobi, Kenya

© ICRC, Agoosto 2020